

## KALA-GUURKA: BILOWGA HABBOON EE DUGSIGA

Tilmaamaha si looga caawiyo qoysaska inay buuxiyaan *Transition Learning and Development Statement*

### MAXAY BILAABIDDA HABBOON EE DUGSIGU MUHIIM U TAHAY?

Bilaabidda habboon ee dugsiga waxay horseeddaa natiijooyinka wax-barasho iyo fayoobida ilmahaaga inta lagu jiro xiliga kala-guurka iyo ka diba. Hubinta kala-guur firfircoon oo habboon wuxuu kaloo taageeraa sii-socoshada wax-barashada iyo koritaanka ilmahaaga. Xoogsaarista weyn ee ku saabsan sii-socoshada wax-barashada waxay qirsan tahay in abuuridda waayo-aragnimooyinka hore iyo kuwa hadda ah ee ilmahaaga inay ka caawinayso inay dareemaan ammaan, isku-kalooni iyo ku xirnaan dadka, goobaha, munaasabadaha, rootiinada iyo garashooyinka. Lahaanshaha bilaabidda habboon ee dugsiga waxay xiriir toos ah la leedahay xagga horumarinta adkaysiga dadka dhexdiisa ah.

### WAA MAXAY TRANSITION LEARNING AND DEVELOPMENT STATEMENT?

Adeegyada carruurnimada hore, dugsiyada, Daryeelka Saacadaha Dugsiga Ka-baxsan (OSHC), iyo qoysaska waxay dhammaan yihiin iskaashadeyaalka barbaarinta waxbarashada iyo fayoobidda carruurta. Si looga dhigo mid u fudud in macluumaadka ay wadaagaan adeegyada, dugsiyada iyo qoysaska ayaa Transition Learning and Development Statement (Caddaynta Kala-guurka) waxaa qora adeegga carruurnimada hore oo loo qoro ilmo kasta markay aadayaan dugsiga.

Caddaynta Kala-guurka waxay la-wadaagtaa macluumaadka ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, horumarka iyo fayoobidda u dhaxaysa adeegyada carruurnimada iyo dugsiyada. Caddaynta Kala-guurka waxay soo koobaysaa ilmahaaga xiisahiisa, xirfadihiisa iyo kartidiisa, waxayna caddaynaysaa itjaahyada shaqsiyeed iyo xeeladaha wax-baridda si looga taageero safarka waxbarashadooda.

Caddaynta Kala-guurka waxay kaa cawinaysaa inaad fahamto, taageerto, kala-xiriirto aad u qareento

waxbarashada ilmahaaga maaddaama ay usoo wareegayann dugsiga. Macluumaadka ku jira Caddaynta Kala-guurka waxay ku caawisaa baraha bareebka uu si dhaqso leh u ogaado ilmahaaga uuna qorsheeyo barnaamijka barashada iyo wax-baridda ee ku habboon. Haddii aad qorshaynayso inaad ilamahaaga u dirto adeegga OSHC, Caddaynta Kala-guurka waxay ka caawinaysaa bareyaasha OSHC inay qorsheeyaan howlgelinta ilmahaaga ee adeegga OSHC iyo inay taageeraan sii-socoshada meelahaas u dhaxaysa.

Caddaynta Kala-guurka waxaa ku jira macluumaad shaqsiyeed oo ay ka mid yihiin magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada iyo sawirka, iyo magacaaga iyo faahfaahinta xiriirkaaga. Waxaa kaloo ku jiri doona magaca iyo faahfaahinta xiriirada ee xirfad-yaqaanada carruurnimada hore ee kale kuwaas oo taageeraya ilmahaaga.

Gacan ka gaysiga Caddaynta Kala-guurka waa mid ka mid u-guurpdda nashaadyada dugsiga ee adiga iyo ilmahaagu aad ka qaybgeli kartaanka hor intaan dugsigu bilaaban ee sannad-dugsiyeedka oo dhan.

### QAYBTEE CADDAYNTA KALA-GUURKA AYAAN BUUXINAYAA?

*Qaybta 1aad iyo 1.1* waxaa soo buuxinaya baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga.

*Qaybta 1.2* waxa soo buuxinaya baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga haddii uu ilmahaagu qabo dib-u-dhaca koritaanka ama iin. Xirfad-yaqaannada carruurnimada hore ee kale kuwaas oo taageera ilmahaaga waxay kaloo gacan ka gaysan karaan qaybtan.

*Qaybta 2aad: Ilmaha* waxa soo buuxinaya ilmahaaga oo uu caawinayo qof weyn oo ay garanayaan ayna ku faraxsan yihiin. Taas waxaa ka mid ah adiga ama baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga.

*Qaybta 3aad: Qoyska* waa adigu inaad soo buuxiso. Waxaa muhiim kuu ah inaad gacan ka gaysato aragtidaada Caddaynta Kala-guurka ee ilmahaaga. Qaybtan waxaa ku jira su'aalo taxane ah si ay u caawiyaan inay ku dhaqsadaan. Ka-jawaabidda qaar ama dhammaan su'aalahaan waxay ka caawin kartaa baraha ilmahaaga ama baraha OSHC (halkii ku habboon) inay siyaabo habboon uga waceliyaan ilmahaaga iyo qoyskaaga waxayna taageerayaan waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga.

---

### **MAXAA DHACAYA KA DIB MARKA AAN BUUXIYO QAYBTAYDA QORAALKA KAL-GUURKA?**

Markaad buuxiso qaybtaada 3aad: *Qoysku* waxay usoo-celinayaan qaybta baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga. Haddii aad ka caawisay ilmahaaga inuu buuxiyo *Qaybta 2aad: Ilmuhu*, wuxuu ku soo-celinayaa iyada iyo *Qaybta 3aad*.

Baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga ayaa isku gayn doona qaybaha Caddaynta Kala-guurka oo dhan wuxuuna ku siin doonaa koobi buuxsan.

Baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu kaloo la wadaagi doonaa koobiga Caddaynta Kala-guurka oo buuxsan dugsiga ilmahaaga iyo adeegga OSHC (halkii ku habboon).

Haddii aadan hubin dugsiga ilmahaagu dhigan doono, baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu ku siin doonaa koobi labaad ee Caddaynta Kala-guurka si aad u siiso koobi dugsiga ilmahaaga markii aad dugsiga ku qorto ilmahaaga.

Haddii *Qaybta 3aad: Qoyska* aan loo soo celin adeegga, markaas baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga wuxuu la wadaagi doonaa dugsiga ilmahaaga iyo adeegga OSHC (halkii ku habboon) wuxuuna ku siin doonaa koobi wixii la wadaagey si aad u haysato.

Cilmi-baarista iyo warcelinta laga helay dugsiyada waxay muujiyeen in la-wadaagidda macluumaadku ay taageerayso kala-guurka guusha leh ee dugsiga. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan doonayn wax macluumaad oo ku saabsan ilmahaaga in lala wadaago dugsiga ilmahaaga, fadlan kala hadal arintan baraha carruurnimada hore ee ilmahaaga.

### **WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Fadlan ka eeg [www.education.vic.gov.au/transitiontoschool](http://www.education.vic.gov.au/transitiontoschool)

Dokumantigan waxaa lagu turjumey dhowr luqadaha bulshada ah kuwaas oo laga helo [www.education.vic.gov.au/transitiontoschool](http://www.education.vic.gov.au/transitiontoschool).